

# WADAJIR FIRFIRCOONAAN WAXTAR LEH

neighborhoods 2020

## Talooyinkii U Danbeeyey

January 22, 2019

Minneapolis
City of Lakes

Neighborhood & Community Relations

# XAAFADAHA 2020

## TALOOYINKII U DANBEEYEY

Laga soo bilaabo 2016-ka, waaxda Xaafadaha iyo Xiriirka Bulshadu (the Neighborhood and Community Relations Department (NCR)) - ilaa iyo waxqabadka xaafadaha ee 2020-ka – waxay ku hawl-jirtey la shaqaynta hogaamiyayaasha xaafadaha iyo masuuliyiinta la doortay siday u aqoonsan lahaayeen dhaqaaalaha, mashaariicda iyo qaab maamulka loo baahan yahay in loogu taageero mustaqbalka si hufan bulshada iyo ururada xaafadaha. Wadahadaladan waxaa xudun u ahaa sidii loo heli lahaa magaalo tayo leh, u diyaar ah koriin, gaarta himilooyinkeeda oo aqoonsata meelaha ururadu ku meteli karaan la xiriirka dadweynaha.

Waxaa jira 84 xaafadood oo la degan yahay Minneapolis kuwaasoo ay u adeegaan 70 ha'yadood oo samafal ah, kalana madax banaan. Ururada xaafaduhu waxay ka qaybgalaan abaabulka dadka deegaanka si ay uga hadlaan arrimaha saamanta ku leh deegaankooda. Magaaladu waa fahamsantahay in ururada xaafaduhu door muhiim ka ciyaaraan aqoonsiga arrimaha gudaha iyo fursadaha ay magaalada Minneapolis uga faa'iidaysan karto kobcinta habka xaafadaha. Warbixin dheeraad ah oo ku saabsan horumarinta urur xaafadeed, fiiri\eeg: *http://www.minneapolismn.gov/ncr/programs/WCMS1P-139935*
Waxaa kaloo jira ururo samafal-bulsheedyo kale oo ku baahsan magaalada oo ahmiyada siiya inay u adeegaan bulshooyin kala duwan. Ururadani waxay gaar ahaan muhiim u yihiin la xiriirka bulshooyinka kala dhaqanka duwan. NCR way taageertaa ururada xaafadaha iyo kuwa dadweynaha kala dhaqanka ah si ay u gutaan hawshooda.

Waxqabadka xaafadaha ee 2020 wuxuu diiradda saarayaa gaar ahaan ururada xaafadaha, ee magaaladu maalgelisay ilaa 1991 markii la aasaasay Mashruuca Dayactirka Xaafadaha (NRP) ee 2020. Hadda, magaaladu waxay maalgelisaa iyadoo u marsiinaysa Mashruuca Ka Qaybgalka Bulshada(CPP). Ururo xaafadeed badani waxay weli maalgelin ka helaan NRP. Maalgelinta CPP waxay ka timaadaa cashuurta magaalooyinka maalgelinaya wuxuuna dhammaanayaa December 31, 2019. Maalgelinta CPP waxaa heli kara ururada xaafadaha waxaana lagu wadaa inuu dhamaado dhammaadka December 2020. Waxqabadka Xaafadaha ee 2020 wuxuu ku talinayaa hab cusub in lagu maalgeliyo oo sii socda December 2020. Taariikhdii hore iyo maalgelinta haddaba waxaa laga heli karaa:
*http://www.minneapolismn.gov/ncr/links/index.htm*


Golaha deegaanku (The City Council) wuxuu aasaasay saddex koox hawleed\shaqo gu’gii 2018-ka si uu u caawiyaan, talooyina u siiyaan, sidii loo taageeri lahaa ururada xaafadaha iyo bulshada. Kooxaha shaqadu waxay ka kooban yihiin hawlwadeeno metelaya ururada xaafadaha, kooxaha dhaqanka, kuwa sinnaanta iyo cunsiriyada khibrada u leh iyo masuuliyiin uu magcaabay golaha deegaanku iyo guddoomiyaha magaalada. Kooxaha shaqadu waxay kulmaan labo jeer bishiiba laga bilaabo August ilaa December 2018, waxayna samaynayaan ilaa in ka badan 900 oo saacadood oo iskaa wax u qabso ah oo ku socota waxqabadka Neighborhoods 2020. Weliba, shaqaalaha magaaladu wuxuu la xiriirayaa dadweynaha ilaa iyo 5 jeer waxaana wadahadaladaa ka soo qaybgelaya ilaa 400 oo qof oo ka warami doona waxay jeclaan lahaayeen in ay xaafadahooda ku arkaan mustaqbalka.

Warbixintani waxay soo koobaysaa talooyinkii shaqaaluhu u soo jeediyey Neighborhoods 2020. Talooyinkani waxay ka turjumayaan saddexda kooxood hawleed, wadahadalka bulshada, iyo hawsha shaqaalaha si ay u soo saaraan qaabdhismeedka lagu taageerayo mustaqbalka ururada xaafadaha iyo kuwa bulshada. Shaqaalaha magaalada ee ka qayb qaatay talooyinkan waxaa ka mid ah Xafiiska Qareenka Magaalada, Xisaabiyaha Guud, Xiriiriyaha Magaalada, Innovation Team, Xafiiska sinnaanta iyo ka mid noqoshada, Farshaxanka, Dhaqanka iyo Xafiiska dhaqaale abuurka, Maaliyada, iyo NCR. Inkastoo qaabdhismeedku raacayo habkan hoos ku muujisan haddana go’aamada gaarka ah waxaa go’aan ka gaaridooda amraya guddoomiyaha magaalada iyo Golaha deegaanka. Kooxaha shaqada warbixinadooda iyo talooyinka ay soo jeediyaan waxaa laga heli karaa : *http://www.minneapolismn.gov/ncr/2020*

DRAFT



## JADWALKA XAAFADAHA EE 2020



## ARAGTIDA

Aragtida The Neighborhoods 2020 waa in la helo bulsho isu dheelitiran oo dadkeeda oo dhan la qaderiyo, bulshada oo dhan lala xiriiro, hogaankuna tixgeliyo kala duwanaanshaha magaalada. Magaalada Minneapolis, ururada xaafadaha iyo kuwa bulshaduba way wada shaqayn doonaan si ay u abuuraan hab bulshadu ku xiriirto kaasoo diirada saaraya goobta iyo dadka ku noolba, kaasoo aqoonsanaya sifooyinka togan ee gaarka u ah iyo xaddidaadaha xaafadaha, fursad sii fikradaha cusub, dadka iyo qorshaha. Xaafaduhu waa bulsho ku hawlan hagaajinta deegaankooda oo u qalma inay ogaadaan qabadaha jira iyo xal u helidoodaba deegaanada ay metelaan

## YOOLALKA

Minneapolis waxay lahaan doontaa hab ka qaybgal bulsho oo dheeliran oo jaangoynaya cid kasta, aqoonsanaya muhiimadda adeega ururada xaafaduhu u sameeyaan magaalada Minneapolis, dhisana awoodda bulshadu waqtiga fog ku habayn karaan, kuna tayayn karaan noloshooda iyo ta xaafadaha (Minneapolis 2040 Plan). Mashruuca xaafaduhu wuxuu samayn doonaa:

- Daahfurnaanta xogta dhaqaalaha, mashruucyada iyo hawlaha
- La xisaabtanka dadweynaha iyo magaalada Minneapolis
- Joogteynta hawlaha magaalada iyo xaafadahaba
- Fududeynta hawlaha so dadweynaha Minneapolis uga qayb galaan si buuxda
- Sinnaanta go’aan gaarida iyo qoondeynta khayraadka
- Wadashaqaynta iyo iskaashiga ururada xaafadaha, kuwa bulshada iyo magaalada Minneapolis
- Ilaalinta dareenka fiican ee bulshada

**Ulajeedada Mashruuca**
Maalgelinta mashruucyada xaafaaduhu wuxuu abuurayaa dadweyne isku tiirsan, oo xiriir la leh dawlad deegaanka, taageerayana ulajeedooyinka bulshada:

- **Identifying and Acting on Neighborhood Priorities Aqoonsashada iyo Samaynta Mudnaanta Xaafadaha**
  Iyadoo la iska kaashanayo dhisida magaalo fiican oo ah mid nolol fiican leh, nabadgelyo ah, laguna soo hiran karo oo xaafadaheeda lagu noolaan karo, ururada xaafadaha iyo magaaladu kiiba wuxuu leeyahay door gaar ah si uu u aqoonsado una sameeyo mudnaanta xaafadaha. Ururada xaafaduhu way aqoonsanayaan dabadeedna samaynayaan dhibaatooyinka saamaynaya xaafadaha, dhaqaalahoodana waafajinaya (shaqaalahooda, maalkooda iyo wixii la mid ah.) ama ay falcelis siiyaan qorshayaasha magaalada, misaaniyada iyo mashruucyada.

- **Saamaynta Go'aamada Qoryaasha, siyaasadaha iyo Adeegyada Magaalada**
  Qaab go'aan gaarida magaaladu wuu fiicnaadaa marka ay ka qayb qaataan bulshada ay saamaynayso. Muhiimada koowaad ee xiriirka bulsho ee magaaladu wuxuu sheegayaa in ciddii go'aankeedu saamaynayaa talo ku lahaato go'aankaas. Iyadoo la kaashanaysa ururada xaafadaha, magaalada Minneapolis way la xiriiri kartaa, laguna soo wargelin doonaa bulshada go'aamada magaaladu saamaynta ku leeyihiin.

- **Kobcinta Isdhexgalka Bulshada**
  Magaalada iyo ururada xaafaduhu waa inay horumariyaan xeelado micno leh – una fuliyaan xeeladahan si guul ah – Marka dad badan la wargeliyo ooy ka qayb qaataan hab loo siman yahay kaas oo ay ku jiraan xeelado kala duwan oo dhiirigelinaya ka qayb qaadashada bulshada reer Minneapolis oo dhan. Ururada xaafaduhu waxay joogaan kaalin ay ku abuuri karaan habab cusub oo isdhexgal iyo meelaynta, si ay u soo saaraan ka qaybgalka iyo hogaanka bulshooyinka aan jirey kuwo aan metelaad lahayn, Natiijo u muhiim ah magaaladu oo lagu xusay qorshaha isu dheelitirka is dhexgalka. Magaaaladu waxay la shaqayn doontaa ururada bulshada si ay u badiso isdhexgalka bulshada iyo cida kale ee danaynaysa bulshada iyo nolosheeda.

## MAALGELIN

Maalgelinta isdhexgalka bulshadu waxaa la bixin doonaa ururada iyo ururada bulshadaba 3-dii sanoba mar si ay u taageeraan awooda ururada qorshahooda.


Maalgelinta loogu talogalay mashruuca isdhexgalka bulshada , 25% waxaa iska leh ururada bulshda (CBO), 75% waxaa leh ururada bulshada ee Minneapolis.

**Maalgelinta Ururka Xaafadda**

Maalgelinta ururka xaafaddu wuxuu ahaan doonaa hab doorasho, kaasoo ururada bulshadu xaq u yeelan doonaan inay heelaan maalgelin haddii ay ogolaadaan raacidda sharciga iyo waxyaabaha looga baahan yahay. Heshiiska waxaa ka mid waafiqida shuruucda sannadlaha ah. Haddii urur go'aansado inaanu ka qayb gelin, waa laga saaraya habka maalgelinta, waxaana hantida loo bixinayaa ciddii ku haboon.

***Saldhiga Maalgelinta:*** **50%** waxaa loo dhigayaa kharashka ururada xaafadaha shaqaalahooda,ijaarka, telefoonada, waraaqaha, iyo joornaalada. Weliba maalgelinta waxaa ku jiri kara cunada, daryeelka caruurta, adeegyada turjumaada ee kuladama bulshada si loogu adeego mashruuca bulshada.

***Saamaynta Maaliyadda:*** **25%** waxaa loo dhigayaa ururada xaafadaha siday u kordhin lahaayeen kulamadooda isdhexgalka. Ururada xaafadaha waxaa lagu dhiirigelinayaa inay baaraan kulamo cusub oo lagu kordhin karo ka qaybgalka bulshada deegaankooda ama deegaamada kale iyo weliba ururada samafalka. Saamaynta maalgelineed waxaa la isku abaalmarin doonaa sannadkiiba mar iyadoo la eegayo waxqabadka ururada.


CITY COUNCIL
NCR POLICY BOARD
NCR
NEIGHBORHOOD & COMMUNITY RELATIONS
COMMUNITY ENGAGEMENT COMMISSION
75%
TECH SUPPORT
OPT-IN NEIGHBORHOOD ORGANIZATIONS
50%
BASE FUNDING
25%
DISCRETIONARY FUNDING
25%
IMPACT FUNDING
25%
TECH SUPPORT
COMMUNITY-BASED ORGANIZATIONS
FUNDING PROPOSALS

***Maalgelin Xaddidan:*** **25%** qadarta lacageed ee loo qorsheeyey ururada xaafaduhu wuxuu diyaar u noqon doonaa mashaariicda mar keliya ah ama mashaariicda ismaamuli kara mustaqbalka ee gaarka u ah xaafad ama deegaan. Maalgelinta xannibaadeed waxaa la siin doonaa urur keliya, kuwo layska kaashado ama mid cid kale maalgeliso oo daboolaya baahiyahan. Tusaale ahaan deegaanada maalgelintani u xaddidan tahay waxaa ku jiri kara aanse ku ekeyn:

- Shaqaalaha isdhexgalka
- Qorshaynta mashruucyada mustaqbalka
- Mashruucyada hantida
- Suuqyada beeraha
- Cagaarinta deegaanada
- Kordhinta ka qaybgalka kulamada bulshada
- Guryaha\Horumarinta ganacsiga
- Mashruucyada deegaanka
- Mashruucyada goobaha nasashada\iskuulada\maktabadaha
- Mashruucyada dhismayaasha gaadiidka
- Mashruucyada kale ee khaaska ah

**Maalgelinta Ururada Dadweynaha**

Ulajeeda maalgelinta ururada bulshadu waa inay wargeliso magaalada ahmiyada baahiyaha ka jira maalgelinta ururada bulshada (CBO). Ulajeedooyinka maalgelinta ee CBO waxay hoos gelaysaa mid ahaan labadan kooxood.

- Mashruucyada horumariya hogaamiyayaasha una diyaariya u adeegida guddiyada magaalada iyo komoshiniska, si faa'iido leh oo sameeya awoodo mid ka mid ah guddiyada ururada xaafadaha ee Minneapolis.

- Mashruucyada ku xira  guddiga magaalda dadweyne kala duwan oo la xiriira dad khaas ah meelo ka baxsan xuduudaha xaafadooda. Mashruucyadani laga yaabee inay jiraan ama waxay noqonayaanmashruucyo cusub.



**Maalgelinta Mashruuca Dayactirka Xaafadaha**

Ururo badani weli waxay ka heli doonaan maalgelin Mashruuca Dayactirka Xaafadaha(NPR). Horumarinta NRP waxay la jaan qaadi doontaa hadafka iyo himilooyinka Xaafadaha ee 2020. Fudaydka, sinaanta iyo maamulku waa ubucda hadafyada NPR.

## LAGA FILAYO URURADA XAAFADAHA

Si loogu noqdo diyaar maalgelinta magaalada, ururada xaafaduhu waa inuu ogolaadaa samaynta marxaladahan soo socda. Hababka ugu fiican waa in la raaco mase loo baahna si loo helo maalgelin.

**Maaliyada iyo Sharciga Xisaabaadka**

Ururada la maalgeliyey waa inay ogolaadaan raacida shariga baarida\dabagalka NRC, kaasoo kor u qaadaya la xisaabtanka. Dabagalka waxaa bixinaya NCR; laakiinse haddaan la ogolaan baaritaan in baarintaanku sababo baa laga yaabaa mashruuca oo la joojiyo. Haddii ururo la maalgeliyey lagu caddeeyo xatooyo, khiyaamo hantiyeed, ururku waa inuu la shaqeeyaa cid kasta oo baaraysa.

Ururada la maalgeliyey waa inay u isticmaalaan xisaabaadkooda software la ogolaaday.

**Waxqabadka la Filayo**

Ururada la maalgeliyey waa inay raacaan ugu yaraan heerarka la dhammaystiri dooro waqtiga heshiiska. Ururada xaafaduhu waxay wargelin doonaan waxyaabahay qabteen sannadkiiba mar.

**Bylaws Xeerarka]**

Si loogu adeego isu ekaanshaha loona fududeeyo hababka kulamada ururka ee bulshada, mashruuca cusub waxaa ku jiri doona ugu yaraan heerar looga baahan yahay ururada la maalgeliyey waa in xeerarkooda ay ku jiraan. Ururada xaafaduhu waa inay u soo gudbiyaan xeerarkooda magaalada si ay u waafaqaan waxyaabaha looga baahan yahay mashruuca si loo helo lagu samayn karo isbedelada lama huraanka ah. Dhammaan xeerarka ururada xaafadaha waa in ay ogolaadaan xubnuhu kulankooda guud.

**Kulamada iyo Ka Qaybgalka**

Dhammaan ururada xaafadaha ee la maalgeliyey waa inay qabtaan kulan sannadle ah kaasoo hawlwadeenada guddiga lagu xulan doono. Kulamo rubuceedna waa looga baahan yahay ururada xaafadaha ee la maalgelieyey.

Habka magcaabidda iyo doorashada xubnaha guddiga waa isku mid dhammaan ururada xaafadaha. Tan waxaa ku jira magcaabida musharixiinta guddiga kulanka sannadlaha ah. Ma'aha muhiim in dadweynaha oo dhammi ka soo qayb galaan kulanka sannadlaha ah laakiinse dan baa ugu jirta ka qayb gelida habka doorasha. Sidaas darteed, hab kale oo lagu codayn karo baa la siinayaa. Hababka codayntu waxay ahaan doonaan kuwo fudud oo la fahmi karo.

Si loo fududeeyo ka qaybgalka habka doorashada, loona kordhiyo wacyigelinta ololaha iyo barida bulshada guud ururada xaafadaha, NCR waxay qabad doonta maalin doorasho oo guud magaalada oo dhan.

**Xubinimada Guddiga iyo Horumarinta Hogaanka**

Helida wakiilnimo ka turjumaysa isku-dhafnaanta bulshada waxay u baahan tahay abaal marin iyo sharci waafaqid. U adeegaysa isu dheelitirka xasiloonida ururka, ogolaanaysana hogaan cusub. Ururada la maalgeliyey oo dhan waa looga baahnaan doonaa:

- In ka badan 25% xubhana guddigu ma adeegi karaan in ka badan 6 sano
- Hawlwadeenka guddiga waqtigiisu waa inuu xadidnaadaa
- Waa in loo ogolaadaa hawlwadeenadii hore xubinimo aan codayn karin


**Kala duwanaanshaha/Wakiil**

Guddiga kala duwanaanshaha waxaa looga baahan yahay in ururada xaafadaha ee la maalgeliyey warbixin sannadle ah. Haddii wakiil guddiga kala duwananshaahuhu uu ka duwan yahay si aad ah isku-dhafka xaafada. Qorshaha Waxqabadka Kala duwanaanshaha baa loo baahan yahay. Qorshahan oo ay soo wada saareen NCR iyo ururka xaafadu kaas oo muujinaya sida ururka xaafadu u hagaajinayo hogaanka gudahooda ee kala duwanaanshaha. Qorsha waxaa ku jira hababka iyo dhaqanka dhiiri gelinaya xubinta cusub ee muujinaysa kala duwanaanshaha xaafadaa gudaheeda, oo uu ku jiro danta bulshadu, jinsiyadaha, labka iyo dhediga, da'da guri-lahaanshaha iyo kuwa ijaarta guryaha, dadka naafada ah, iyo hab-galmoodkooda. Qorshuhu wuxuu tusayaa hababka, kulamada iyo dhacdooyinka lagula xiriirayo dadka isku dhafka bulsho ee ugu badan. Ururada aan dhammaystirin qorshe aanna la kulmin guddiga kala duwanaanshaha heerarkooda 18 bilood guddahood maalgelintooda waa la dhimi karaa ama la joojin karaa.

**Isdhexgalka**

Ururada xaafadaha ee la maalgeliyey waxaa looga baahan yahay in soo saaraan qorshe tayaysan oo xiriir oo ay ku jiraan in si toos ah loola xiriiro bulshada sida albaabada oo lagu garaaco, miisas warbaxineed oo la dhigto goobaha xafladaha. Qorsha xiriirka waa inuu jiraa arrimo la mid ah kuwa Qorshaha Kaladuwanaanshaha. Waa muhiim in qoraal keliya aan loo tixgelin doonin isdhexgal bulsho.

Ururada xaafaduhu waa inay soo gudbiyaan qorshe la cabiri karo una gudbiyaan dadweynaha, oo ay ku jiraan kuwa lahayn masuuliyiin ku filan, laguna xiriiri karo fursado kala duwan iyo si ka fool ah.



waxay kaloo taageeraysaa adeegyada ururada xaafadaha. Meelaha la caawinayo waxaa ka mid ahaan kara kumase koobna:

- Warbixin xoogan oo ku saabsan sida looga qayb qaadan karo ururada xaafada.
- In la siiyo tababar khasab ah oo sannadle ah xubin kasta oo cusub oo guddiga ka mid ah mar kasta oo qof ka mid ah ururada xaafaduhu u baahdo
- In la siiyo tababar sannadle ah oo khasab ku ah xubnaha guddiyada ururada xaafadaha
- Horumarinta tababarada iyo hababka ugu wanaagsan ee loo maalgeliyo ururada
- Samaynta iyo qaybinta buug –gacmeed (Handbook) ay guddiyadu siin karaan ururada la maalgeliyey guddiyadooda – waxaana ku jira hababka ugu wanaagsan ee loo abuuro warbixinta guddiyadooda.
- Hubinta, tababarada iyo hirgelinta mashruucyada farsamada ee xisaabaadka, iskaa wax-u-qabsashada iyo ilaalinta deeqaha, qorshaynta iyo xiriirka
- teknoolajiyo isticmaal sahlan oo lagu ilaaliyo kharashka heshiisyada,isbedelada qorshaha iyo heerarka mashruucyada
- Cilmi-baaraya, ogaanaya oo xiriirinaya fursadaha qiimayaasha jaban ee suurogalka ah – gudoomiyayaasha iyo hawlwadeenada, guud ahaan khatarta iyo caymiska caafimaadka
- liisto ay ku qoran yihiin turjumaanada iyo weliba qalabka turjumida ee magaalada ee ay heli karaan ururadu
- Samaynta liisto ay ku qoran yihiin xarumaha daryeelka caruurta
- Samaynta mashruuc farshaxameed ama mid ku xiran heshiis ayna heli karaan ururada xaafaduhu
- La heshiinta qareen ku takhasusay ha'yadaha samafalka oo waqti u haya ururada xaafadaha ee la maalgelieyey
- Abuurida abaalgudyo mashruucyada ugu fiican magaalada
- Abuurida hogaan bulsho magaalada oo dhan

**Adeegyada Urursan\La Mideeyey**

NCR waxay dhiirigelindoontaa isla shaqaynta ka dhexaysa ururada xaafadaha iyo kuwa bulshada si ay isugu biiriyaan adeegyadooda. Gunno dhibceedyo baa la siin doonaa soo jeedinta maalgelinta ururadii raadinaya inay adeegyadooda isku daraan ama biiriyaan. NCR waxay bixin doontaa caawimaada farsamo iyo dhaqaaleba adeegyada la iska kaashado si loo kordhiyo tayadooda. Adeegyada laysku biiriyey waxay yarayn doonaan kharashka guud islamarkaana urur kasta wuxuu awoodaa kor u qaadida heerarka adeegiisa. Adeegyada laysku biiriyo waxaa ka mid ah kumase dhamma:

- Shaqaalaysiinta iyo shaqaalaha xirfahada gaarka ah leh.
- Kharashka maamulka sida ijaarka iyo kharashka dheeraadka ah
- Adeegga xisaabaadka
- Isdhexgalka iyo ka qaybgalka tusaale ahaa in albaabada la garaaco
- Wadaaga xafiiska
- Joornaalada, shabakadaha iyo aaladaha kale ee lagu xiriiro
- Daryeel caafimaad iyo faa'iidooyinka kale dadka shaqeeya aan dhammaystirnayn
- Gadashada adeegyo is-wata
- Mashruuca ama mashruucyada ka jira xaafado badan

NCR way kordhinaysaa caawimaadda dhaqaale si loo kordhiyo suurogalnimada adeegyada.

## MAAMULKA

*Guddiga Ka Qaybgalka ee Bulshada (CEC)* – Waxaa la soo jeediyey in la abuuro guddi cusub oo ka kooban 10 ilaa 15 xubnood oo bedeli doona Guddiga Xaafadaha iyo Isdhexgalka Bulshada ee hadda jira. Guddigani ma ka turjimi karo baahida hadda taagan ee magaalada inkastoo guddigu qabtay shaqadii loo abuuray. Guddiga cusubi wuxuu lahaan doonaa dad metelaya xaafadaha, bulshooyinka dhaqankooda, shaqaalaha magaalada oo lagu soo magcaabayo habka magalaada ee xubnaha lagu magcaabo. Shaqada guddigu waa in uu la taliyo gudoomiyaha magaalada iyo gudoomiyayaasha xaafadaha

Guddiga Dayactirka Xaafadaha – Ururo badani weli way ka heli doonaan dhaqaale Mashruuca Dayactirka Xaafadaha (NRP). Dayactirka NRP waxaa lagu toosinayaa aragtida iyo yoolalka Xaafadaha ee 2020. Waxaa lagu wargelinayaa in Guddiga Dayactirka Xaafaduhu ku wado shaqadiisa si guddi madaxbanaan.

## SIYAASADDA KA QAYBGALKA EE MAGAALADA

Kooxuhu waxay u soo jeediyeen talooyin ku aadan siyaasadda ka qaybgalka ee magaalada. Iyagoo ka faa'iidaysanaya Qaabdhismeedka Ururka Caalamiga ee Kaqaybgalka Bulshada (IAP2) way qiimaynayaan, fikrado kala duwn. Siyaasadda ka qaybgalka ee magaaladu wuxuu u baahan yahay inuu la yeesho wadahadal dheeraad ah waaxaha magaalada, siyaasiyiinta, xubnaha bulshada iyo masuuliyiinta la doortay. Talooyinka kooxaha kala duwan waxaa loo gudbin doonaa gudoomiyayaasha degmada iyadoo la ogyahay in horumarin dheraad ah loo baahan yahay.

neighborhoods 2020

## COMMENT CARD

Fadlan noo sheeg waxaad ka qabto.

______________________________

______________________________

______________________________

______________________________

______________________________

______________________________

______________________________

______________________________

______________________________

______________________________

______________________________

______________________________

______________________________

______________________________

______________________________

**Submit comments to:**
Steven Gallagher
Neighborhood and Community Relations 105 5th Ave South, Suite 425
Minneapolis, MN 55401
neighborhoods2020@minneapolismn.gov

neighborhoods 2020

Wixii dheeraad ah nagala soo xiriir

Neighborhood and Community Relations
612-673-3737
ncr@minneapolismn.gov

Dadka dhegaha la' ama maqalku ku aadag waxay isticmaali karaan
311 or 612-673-3000
TTY users call 612-673-2157
Para asistencia 612-673-2700
Rau kev pab 612-673-2800
Hadii aad caawimaad u baahantahay
612-673-3500

**Warbixintan waxaa diyaariyey NCR oo kaashanaysa Zan**

Minneapolis City of Lakes | Neighborhood & Community Relations